



Waa maxay Early Achievers?

Early Achievers ayaa isu keenaya qoysaska, xirfadlayaasha waxbarashada hore iyo khayraadka si loo dhiso nidaam gobolka oo dhan ee daryeelka carruurta oo tayo sare iyo waxbarashada hore leh, oo lagu hubiyo in:

- **Carruurta** ka helaan waaya aragnimada barashada hore oo tayo sare leh oo ka caawiso iyaga in ay hormariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay ugu guulaystaan dugsiga iyo nolosha.
- **Uu ka caawiyoo waaladiintu** inay helaan daryeelka carruurta oo aad u sareeya iyo barnaamijyada waxbarashada hore ee buuxinaya baahiyadooda.
- **Xirfadlayaasha Waxbarashada Hore** waxay helaan macluumaadka iyo kaalmooyinka ay u baahan yihiin si ay u bixiyaan daryeel tayo leh oo taageera waxbarashada iyo horumarka ilmo kasta.

Sidee ayay Early Achievers u shaqeeyaa?

Early Achievers waxay adeegsadaan habka darajada si ay ula socdaan koritaanka tayada goobaha waxbarashada hore ee ka qaybqaadanaya.

Heerarka 1 iyo 2, ka qaybgalayaashu waxay ka shaqeeyaan tayada iyagoo ku hagaajinaya tababarada iyo hawlaha.

Xarumaha lagu qiimeeyo **Heerarka 3—5** waxay gaareen heerka tayada heer sare ah kuna gaareen qiimeynta goobta



Heerka 5:

Heerka Ugu Sareeya ee Tayada

Heerka 4:

Gaaraya Tayo Sarreysa

Heerka 3:

Muujinayaa Tayo Sare

Heerka 2:

Ku Ballanqaaday Tayo Sare

Heerka 1:

Daryeelka Carruurta ee Shatiga Leh - Aasaaska Tayada Sare

Qiimeyntu waxa ku saleysan tahay caddeyn si daraadeed waxaad dareemi kartaa kalsooni ku saabsan doorashada daryeelka ilmaha. Ka fiiri bixiyayaasha ka qaybgalkooda iyo xaalada darajeentooda www.del.wa.gov/check

Weydii bixiyaha waxbarashada hore iyo daryeelka ilmaha arrinta Early Achievers maantay!

Waayo Tayadu Macno ayay Leedahay